## Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu aanu qabin dhega la'aan?

Haddii baaritaanadu muujiyaan in ilmahaagu aanu qabin dhega la'aan, weli waa muhiim inaad isha ku hayso ilmahaaga maqalkiisa.

Carruurta yaryar qaarkood ayaa laga yaabaa inay qabaan khatar xagga yeelashada maqal la'aan markay sii weynaadaanba. Dhakhtarkaaga maqalka ayaa kuu sheegi doona haddii kani yahay kayska ilmahaaga waxayna qabanqaabin doonaan baaritaan kale oo maqalka marmarka qaarkood ka hor inta aanu hal sano jirsan haddii loo baahdo.

in kasta oo tira aad u yar oo carruurta ahi leeyihiin khatarta ah inay yeeshaan maqal la'aan, weli waa muhiim in ilmahaaga lagu sameeyo baaritaanka maqalka haddii lagu taliyo.

> In la ogaado waqti hore maqal la'aanta waxay siisaa ilmaha fursada ugu fiican in laga caawimo ilmahaaga hadalkiisa iyo koritaanka maqalka, iyo barashada mustaqbilka.

## Adeega Kaalmada Qoyska Queensland ee Lumitaanka Maqalka ee Queensland (QHLFSS)

Adeega Kaalmada Qoyska Queensland ee Lumitaanka Maqalka (QHLFSS) wuxuu siiyaa kaalmo carruurta yaryar ee lagu sheegay lumitaanka joogto ah oo maqalka. Haddii ilmahaaga la ogaado inuu qabo dhega la'aan joogto ah, Fududeeyahay Kaalmada Qoyska ayaa kula soo xiriiri doona, wuxuuna diyaar u yahay idin kala shaqeeyo arrinta qofkaasi adiga iyo qoyska muddo dheer.

Adeegu waa u lacag la'aan qoyska. Haddii aadan maqal QHLFSS, waxaad kala xiriiri kartaa 1800 352 075.

**Remember that a child's hearing can be tested at any age. If you have concerns about your baby's hearing, contact your doctor to ask for a referral to an Audiologist to have your baby's hearing tested.**

### Ballantat Maqalka

**Taariikhda iyo waqtiga:** ..........................................................

Adeega Maqalka: ..........................................................

..........................................................

Cinwaanka: ..........................................................

Telefoon nambarka: ..........................................................

> Haddii aadan helin ballanta dhakhtarka asbuuc gudahiis ilmahaaga baaritaankiisa maqalka ee 2aad, fadlan la xiriir adeega maqalka ee aad tegi doonto, ama QHLFSS tel: 1800 352 075.

## Maxaa dhacaya haddii aanaan ballanta imaan karin?

Haddii aadan iman karin ballantaada, u sheeg dhakhtarkaaga sida ugu dhaqsaha badan ka hor ballanta si aad u bedesho ballantaada.

Tijaabinta maqalka ilmaha ayaa waxa ugu fiican markay aad u yar yihiin (markay si fiican u seexdaan). Dib u dhigida ballamahaaga waa in laga fogaadaa intii suurtagal ah.

## Immisa ayaa ballantu iigu kacaysaa?

Baaraha maqalkaagu wuxuu bixin doonaa faahfaahinta adeega maqalka ee laga helli karo agagaarkaaga.

Adeega dadweynaha ee maqalka ayaa sameeya tijaabada lacag la'aan carruunta xaqa u leh medicare-ka. Waxaa helli kara dhamaan carruurta, iyada oo aan ku xirnayn ama ku dhasheen isbitaalka dadweynaha ama kuwa gaarka ah.

Haddii aad doorato in aad aado dhakhtarka maqalka, waxaad u baahan doonta inaad ogaato in qiimaha ka imanaya baarista waxaadna u baahan doontaa inaad la xiriirto adeega si aad ugala hadasho.

# Your Baby's Audiology Hearing Test

## Ilmahaaga Baaritaankiisa Maqalka




**ilmahaaga waxaa loo bedelay dhakhtarka dhegaha si loo sameeyo baaritaan maqal oo dheeraada.**

**Qoraalkaani wuxuu sharxayaa sababta ilmahaaga loo xawilay iyo waxay lug ku yeellanayso.**

Queensland Government

## Maxaa ilmahayga loogu xawilay dhakhtarka dhegaha?

Ilmahaagu wuxuu haystaa 'xawilaad' labadooda baaritaan oo maqalka. Taas macneheedu waxa weeye baaritaanku ma awoodo inuu meesha ka saaro dhega la'aan, ilmahaaguna wuxuu u baahan yahay baaritaano maqal oo siyaada ah oo uu sameeyo dhaqtarka maqalku (Audiologist).

Waxaa jira sababa dhowra oo keena in ilma yar loo xawilo baarista maqalka. Waxaa laga yaabaa in ilmahaagu qabo:

- Dhega la'aan buuxda;
- Dhega la'aan muddo gaaban ah, dheecaan dhegaha ku jira ama xirnaansho aan joogta ahayn oo dhegahooda ku dhacay dhalashada ka dib, taasi waxaa laga yaabaa inay saamayso maqalkooda waqtiga baarista maqalkooda;
- In aanay xasiloonayn intii baaritaanka maqalku socday, ama
- Lala kulmay sawaxan dibada ah intii baaritaanka dhegahu socdeen.

## Waa maxay dhakhtarka maqalku?

Dhakhtarka maqalku waa qof ku takhasusay maqalka oo leh xirfada iyo qalabka lagu sameeyo baaritaan tifatiran oo ah dhegaysiga (ogaanshaha baaritaanada maqalka).

## Waa maxay ogaanshaha dhegaysiga baaritaanku?

Ogaanshaha baarista maqalku waxay ogaataa haddii ilmuhu leeyahay maqal ama lumiyey maqalka. Haddii ilmuhu maqalka lumiyey, waxaa lagu samaynayaa baaritaan ogaaneed oo muujin doona:

- haddii uu yahay ku meel gaar ama joogto
- heerka ama inta lumitaanka maqalku le'eg yahay (ka soo bilaabanaya mid sahlan ilaa mid maqal la'aana)
- haddii lumitaanka maqalku yahay hal dheg ama labada dhegoodba.

Badanaa waxay qaadataa in ka badan hal ballan si loo hello dhamaan macluumaadka ku saabsan ilmahaaga maqalkiisa.

## Maxaa dhacaya inta baaritaanadu socdaan?

Dhakhtarkaaga dhegaha ayaa samayn doona baaritaano badan oo kala duwan. Baaritaan walba wuxuu eegaa qayb ka mid ah nadaamka ilmahaaga maqalkiisa. Dhakhtarku wuxuu sharxi doonaa mid kasta oo ka mid ah baaritaanada inta ballanta lagu jiro.

## Goorma ayaa ilmahaygu u baahan doonaa in la baaro?

Carruurta yaryar oo natiijada 'xawilida' labada dhegoodba waxaa waajiba in la baaro laba asbuuc gudaheed baaritaankooda labaad. Carruurta ku leh hal dheg 'xawilaada' waxaa waajiba in la baaro 6 asbuuc ka dib baaritaankooda labaad.

## Ilaa intee baaritaanku qaadan doonaa?

Carruurtu way kala duwanaanaysaa, laakiin ballan walbaa waxay qaadan kartaa ilaa 3 saacadood. Carruurta badankeed uma baahna waqti intaan le'eg, laakiin waxaa fiican in la ogolaado maalin barkeed haddii wax dhacaan.

## Sidee ilmahayga ugu diyaariyaa baaritaanadaan?

Dhakhtarkaaga ayaa ku soo wici doona ama kuu soo diri doona sida loo diyaariyo ilmahaaga ama baaritaanka.

Diyaarinta ilmahaaga waxay kaa caawimaysaa habka baaritaanka. Ilmahaagu wuxuu u baahan yahay in uu yimaado ballanta isaga oo soo jeeda, laakiin daalan diyaarna u ah in uu seexdo.

Taas waxaa sabab u ah baaritaanada badankood waxaa la sameeyaa marka ilmahaagu hurdo, maadaama dhaqdhaqaaqo farageliyo baaritaanka.





Waa muhiim inaad wacdo dhakhtarka maqalka maalinta ka horraysa ballanta haddii aadan helin macluumaadka diyaargarawga ama aadan hubin wixii la samaynayo.

## Goorma ayaan ogaanayaa natiijooyinka?

Dhakhtarkaaga ayaa kaala hadli doona natiijooyinka maqalka inta lagu jiro ballan walba.

## Waa maxay natiijooyinka dhici karaa ilmahayga baaritaanada maqalka ee wax lagu ogaanayo?




## Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu qabo maqal la'aan?

Haddii ilmahaagu qabo maqal la'aan aan sii jirayn, dhakhtarkaaga ayaa doonaya in uu mar kale ku arko si uu ula socdo maqalkooda. Haddii aan maqal la'aanta ku meelgaarka ahi aanay fiicnaan, dhakhtarka dhegaha ayaa ku talin doona in ilmahaagu arko qofka ku takhasusay dhegaha, sanka iyo cunaha (ENT).

Haddii ilmahaagu leeyahay maqal la'aan joogto ah, dhakhtarkaaga dhegaha ayaa u xawili doona ilmahaaga qaar ka mid ah ama dhamaan kuwa soo socda.

- Rugta Maqalka Ilmaha
- Qofka ku takhasusay dhegaha, sanka iyo cunaha
- Dhakhtarka carruurta yaryar
- Australian Hearing (wixii la xiriira aallada caawima maqalka)
- Kaalmada Qoyska ee Maqal la'aanta Queensland (QHLFSS)



Reviewed 2018